

**Xeer Madaxweyne J. - Decembar 31, 1963, lamba. 74**

**Ururka Adeegyada Caafimaadka Xoolaha.**

### **Madaxweynaha Jamhuuriyadda**

Markuu arkay qod. 81, farqadiisa labaad, ee Dastuurka;

Markuu arkay qodobada 12, 17, 22 iyo 23 ee Sharcigii 3 Juun 1962, lamba. 14 ee Nidaamka Dawladda;

Markuu tixgeliyay baahida, iyadoo la sugayo xeerar dhameystiran oo arrinta ah in si wanaagsan la isugu duwo hay'adaha dhuleed ee Adeegyada Xannaanada Xoolaha, iyada oo loo marayo sameynta Adeegyada, dhakhaatiirta xoolaha ee degmada iyo qaybaha caafimaadka xoolaha ee gobolka;

Markuu dhageestay Golaha Wasiirada;

Markuu arkay soo jeedinta Wasiirka Caafimaadka, Xanaanada Xoolaha iyo Shaqada oo heshiis la ah Wasiirka Arrimaha Gudaha;

### **Wuuxuu Go'aamiyay**

#### **Qod. 1**

#### **Qaybaha Caafimaadka Xoolaha ee Gobolka**

Qaybta caafimaadka xoolaha ayaa laga aasaasay magaalomadaxda gobol kasta.

Madaxa qayb kasta oo ka mid ah qaybaha caafimaadka xoolaha waxaa masuul ka noqonaayo dhakhtarka xoolaha oo ka soo qalin jabiyyat jaamacadda, waxuuna ka noqon doonaa Agaasinka Xanaanada Xoolaha.

#### **Qod. 2**

#### **Hawlaha Dhakhtarka Xoolaha ee Gobolka**

Takhtarka xoolaha ee gobolku wuxuu ka mid yahay Madaxa Waaxda Dhakhtarka xoolaha ee gobolku wuxuu qabtaa fuliyaana hawl-qabadyada ku wajahan dhammaan adeegyada degmooyinka ee gobolka, isagoo bishiiba warbixin qoraal ah ugu gudbinaayo waaxda caafimaadka xoolaha oo si telegraph ah warbixin wixii cudurro ee dillaaco ama faafa.

#### **Qod. 3**

#### **Adeegyada Caafimaadka Xoolaha ee Degmada**

Magaalamadaxda degmo kasto waxaa laga dhisay adeegga caafimaadka xoolaha.

Adeeg kasto waxaa madax ka ah Kaaliyaha Xanaanada Xoolaha oo shahaado leh kaas oo qabta jagada Kaaliyaha Caafimaadka Xoolaha ee Degmada.

#### **Qod. 4**

#### **Hawlaha Kaaliyaha Caafimaadka Xoolaha ee Degmada**

Kaaliyaha Caafimaadka Xoolaha ee Degmada wuxuu kala dambeyn ahaan hoos tagaa dhakhtarka xoolaha ee gobolka.

Kaaliyaha caafimaadka xoolaha ee degmadu waxa uu leeyahay hawlo gaar ah oo la xiriiro daawaynta iyo ka hortagga cudurrada ee xoolaha. Waa inuu ku wargeliyaa qaab telegaraaf ama haddii ay dhacdo in degmadu telegraph lahayn dariiq kasta oo kale oo degdeg ah oo loo maro dhakhtarka xoolaha ee gobolka, iyo sidoo kale waa in uu ku wargeliyo cudur kasta oo ku dhaca indhaha iyo tallaabooyinka ku habboon.

**Qod. 5**  
**Kharashka Miisaaniyadda**

Kharashka la xiriiro waxa laga bixin doona Ciwaanka 10, cutubyada 1 iyo 12 ee Sannad maaliyadeedka 1963, iyo cutubyada kaloo u dhigma ee sannadaha maaliyadeedka ee soo socda.

**Qod. 6**  
**Xeerarka la Tirtiray**

Xeer kasta oo liddi ku ah ama aan waafaqsanay xeerkan waa la tirtiray.

**Qod. 7**

Xeerkana ayaa dhaqan galaya maalinta ku xigta maalinta lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah, waxaan lagu dari doonaa Ururinta Sharciyada iyo Xeerarka rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Soomaaliya.

Cid kasta oo mas'uul ah waxa waajib ku ah in ay ilaalso oo ay u ilaalso sida sharciyada dalka.

Muqdisho, 31 Decembar, 1963.

**Aden Abdulla Osman**

Wasiirka koowaad

**Abdul-Rashiid Cali Shermarke**

Wasiirka Wasaaradda Caafimaadka, Xanaanada Xoolaha iyo Shaqada

**Maxamed Caydiid Maxamed A'dan**

Wasiirka Arrimaha Gudaha

**Maxamuud Cabdi Nuur**

Arkay oo ku diiwaan gashan - Reg. lamba. 4, xaashida lamba. 30.

Muqdisho, Waa 23 Febraayo 1964kii.

Hantidhwraha Guud: **Ali Ahmed Omar**